# Guudmar

Soomaaliya weli waa meel ay curyaamiyeen dagaallo naxariis darro ah oo u dhexeeya Dawladda Federaalka KMG ah, oo gacanta ku haysa magaalada Muqdisho qayb yar oo ka mid ah, iyo kooxaha mucaaradka ah oo maamula dalka intiisa badan. Sannadkii hore dagaallo qaraar ayaa ka socdey deegaanno muhiimad istiraatijiyadeed leh, oo ay ku jirto Muqdisho, halka dalka intiisa kale uu badankiis illaa xad ku naaloonayey nabad.

Dadka ku nool magaalada caasimada ah ee burburtey iyo kuwa ku nool deegaannada ka nabadgelyo wanaagsan waxay labaduba la kulmeen xadgudubyo naxariis darro ah oo heerar kala duwan ahaa. Koonfurta dalka intiisa badan, oo ay maamulaan kooxda Islaamiyiinta hubeysan ee al-Shabaab, shacabku waxaa lala beegsadey dilal qorsheysan iyo jirdil, falal wax caburin ah oo bulshada lagu xakamaynayo iyo ciqaabo naxariis la'aan ah oo lagu fulinayo Shareecada (sharciga islaamka) oo ay si qallafsan iyagu u tarjumeen. Dhinaca kalena, Muqdisho, Hoobiyayaasha ay ridayaan al-Shabaab iyo ciidamada Midowga Afrika ee halkaas loo geeyey si ay u ilaaliyaan dawladda KMG ah ee caalamku taageero waxaa ay weli dilayaan dadka rayidka ah burburinayaanna magaalada. Dhammaan dhinacyada oo dhami waxay jebiyeen xeerarkii dagaalka markii ay gaysteen weerarro aan kala sooc lahayn iyo xadgudubyo kale.

Al-Shabaab waa koox xag-jir ah oo ka farcantey Midowga Maxkamadaha Islaamiga ah, oo ahaa isbahaysi ay taageerayeen mallishiyaad gacanta ku dhigay Muqdisho qayb ahaan sanadkii 2006-dii kahor intii uusan dagaal kaga adkaanin milateriga Itoobiya oo soo farageliyey Soomaaliya. Qaar kamid ah hoggaamiyayaasah Al-Shabaab waxay xiriir la leeyihiin Al-Qaacida, iyadoo Dawladaha Mareykanka, Midowga Yurub iyo in badan oo ka mid ah dawladaha gobolkuna ay dhiillo u arkayeen soo bixidooda. Maantay waa kooxda kaliya ee hubaysan ee ugu awoodda badan Soomaaliya, iyadoona gacanta ku haysa deegaan ka ballaaran kooxaha kale oo dhan.

Deegaanno badan, xukunka al-Shabaab waxaa uu illaa xad u keeney nabadgelyo iyo kala dambayn oo si aad ah uga duwan fawdada ka jirta Muqdisho. Dadka ku nool qaar kamid ah deegaannadaas waxay Human Rights Watch u sheegeen inay al-Shabaab joojisey baad dhib joogto ah ku haysay, burcadnimo iyo dil ay ku hayeen tuugada iyo malliisiyaad iskood

u qawlaysta. Laakiin xitaa meelaha ay arrintani xaqiiqo jirta ka tahay, nabaddu waxay ku timid qiimo aad u sarreeya—gaar ahaan dumarka.

Saxaafadda caalamku waxay isha ku haysay weerarrada is miidaaminta ah ee al-Shabaab, madax-goynta, dhagax lagu diley dumar lagu eedeeyey inay dhillaysteen iyo addimo-goynta tuugo la xukumey. Fiiro ku filan lama siinayn cadaadiska aan loo adkaysan karin ee si joogta ah uga mid noqdey nolosha maalinlaha ee dadka ay xukumaan al-Shabaab, halkaasoo maamullada deegaanka ay isku dayayaan tallaabooyin qallafsan oo aan loo adkaysan karin oo magaca Shareecada lagu fulinayo.

Tallaabooyinkani waa kuwo daqiiqad-daqiiqad ilaalo uga haya nolosha qofka, laga billaabo siday dadku u labistaan una shaqeeyaan ilaa iyo isdhexgalka macaamilka ragga iyo dumarka. Ciqaabaha xitaa dembiyada yar-yar waa kuwo si nidaam la'aan ah horeba laga fuliya si xukun la'aan oo naxariis darro. Jawi baqdineed oo jira darteed ayaa dadka badankiis ka hortaagan inay si muuqata uga hadlaan xadgudubyada awood sheegadka ah. Sida uu qof ka mid ah dadka ku dhaqan degmada Ceel-Waaq tilmaamey "Waan iska aamusnaa. Haddii ay noo sheegaan tilmaamo gaar ah oo aan raacayno, waan raacnaa."

Xorriyadii dumarku ku haysan jireen dhaqankii soo jireenka ahaa ee Soomaalida si muuqata ayaa la duuduubey. Deegaanno badan dumarka waxaa laga joojiyey inay sameeyaan shaqo kasta oo keeni karta inay is-dhexgalaan ragga—xitaa shaqo ganacsi aad u yar oo badankood ay noloshoodu ku tiirsan tahay. Maamulka al-Shgabaab waxay xir-xireen, u hanjabeen amaba karbaasheen dumar aan xisaab lahayn oo isku dayey inay reerahooda ka masruufaan koobab shaah ah oo ay iibiyaan. "Waxaan awoodi jirnay inaan si xor ah u socdo una shaqeysto," ayey haweeney ku warantey. Laakiin markii al-Shabaab ay la wareegeen deegaankeedii, "Waxaan dareemey sidii inaan xabsi ku jiro oo kale".

Deegaanno badan, saraakiisha al-Shabaab waxay dumarka ku qasbeen inay xirtaan nooc gaar ah oo ah cabaayad culus, oo ah lebis lagu yaqaan Islaamka kaasi oo qariya waxkasta inta aan ka ahayn wejiga, calaacalaha iyo cagaha. Dumarka aan sidaas yeelin badanaa waa la soo qabtaa iyadoo la arkayo ayaana la karbaashaa ama labadaba waa la isugu daraa. Human Rights Watch waxay waraysatay haweeney dadka dhexdooda inta lagu karbaashey hadana Konteenar lagu xirey, kadib markii ay iyadoon cabaayad xirnayn ay aqalkeeda orod uga soo baxdey iyadoo daba joogta cunugeeda oo dariiqa u soo baxay. Dumar badan, gaar ahaan kuwa deegaannada saboolka ah ee miyiga ku nool ma awoodaan dharkaan qiimahoodu sarreeyo marka awoodooda loo eego waxaana dhacda inay hal labis ku wadaagaan dhowr qofood oo reerkooda ah ama ehelladooda—taasoo macnaheedu tahay in markiiba hal qof oo kaliya uu guriga ka bixi karo.

Ma ahan dumarka oo kaliya inta uu dhibku ka soo gaarey sida naxariis darrada ah ee ay al-Shabaab isugu dayayaan inay xukunkooda ku socod siinayaan. Sharciyaduna sida qaalibka ah waxay u muuqdaan qayb ahaan kuwo ku xiran ra'yiga maliishiyada fulinaysa. Rag badan oo dhallinyaro ah ayaa sharxey sida maliishiyada al-Shabaab ay ugu hanjabeen inay xirayaan hawlo 'waqti-lumis ah' oo ay ku jireen darteed sida inay ciyaarayeen kubadda cagta. Nin ayaa human Rights Watch u sheegey inay al-Shabaab wadada dhexdeeda jilbaha dhulka u dhigeen kuna amreen inuu madaxa ku xiirto jab quraarad ah, kadib markii ay go'aansadeen in timihiisu aad u dheer yihiin. Qaar kalena waxay ka hadleen in `xabsi la dhigey ama la jeedalay kadib markii ay ku dukan waayeen waqtigii loogu talo galay, iyo waqtiyo maleeshiyo kormeer samaynayey ay burburiyeen taleefoonada gacanta ee ay ku duuba nyihiin heesaha reer Galbeedka.

Muqdishu, dadka rayidka ahi waxay ku jiraab xayndaabka xaalad taas aad uga duwan: Dagaal dhiig badani ku daatey oo aan laga lug baxayn oo ay isku horfadhiyaan TFG-da oo ay ilaalinayaan 5,300 askari oo ka socda Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM) oo ay ka hor jeedaan mucaarad ay hormuud u yihiin al-Shabaab. Rayidka ku nool Muqdisho waxay weli ku jiraan inay ku sii samraan silica dagaalka oo muddo dheerba ahaa mid ku tilmaaman weerarrada aan kala sooca lahayn ee ay dhinacyada oo dhami gaysanayaa.

Dagaalyahaniinta mucaaradku waxay si sharci darro ah uga hawlgalaan xaafadaha ay rayidku sida aadka ah u degan yihiin mararka qaarna waxay rayidka ka dhigtaan "gabbaad" si ay hoobiyayaal ugu tuuraan fariisimada Dawladda iyo AMISOM—waana weerarro si aan kala sooc lahayn loo qaado ayna inta badan ku burburaan guryo rayidku leeyahay marar dhif ah ayaana lala helaa bartilmaameedyo milateri. Inta badan AMISOM ama ciidanka TFG-da ayaa si la mid ah uga soo jawaaba, iyagoo weerarro hoobiyayaal ah oo aan loo meel-dayin ku qaada xaafadihii ay maliishiyada mucaaradku wax ka soo tureen ay hadana ka carareen—iyagoo rayidka oo kaliya kaga tegeya masiibadii ka dhalatey weerarkooda.

Human Rights Watch waxay wareysatey dad arkey gantaallo hoobiye oo si aan kala sooc lahayn loogu garaacey aqalladooda qoysaskooda oo dhanna cad-cad u burburiyey. Wiil 14-jir ah waxaa uu mid ka mid ah weerarradan oo kale ku waayey waalidkiis iyo 4 wiil oo walaalihiis ah. "Waxaan arkey cad-cad ka mid ah gacmahooda iyo lugahooda oo daadsan meel u dhow gurigeenna oo aan ku nasan jirney", ayuu yiri, "Inta naxdintii iga badatay, ayaanan garan karin qofka aan ahay."

Waxaa intaas raaca, in al-Shabaab iyo xoogagga kale ee mucaaaradku ay inta badan dil ugu hanjabaan dadka ay uga shakiyaan inay taageero u hayaan mucaaradkooda ama cidii diida

inay qortaan oo ay la shaqayso. Mana ahan hanjabaadyo iska maran ee—ciidamada mucaaradku waxay si joogto ah u dilaan rayidka iyadoon haba yaraatee aan cidina la xisaabtamayn. Wiil dhallinyaro ah ayaa Human Rights Watch u sheegey in markii walaalkiis oo 15-jir ah uu ka goostey al-Shabaab, ay dabley al-Shabaab ahi dileen adeerkiis kadib markii uu diidey inuu u sheego halka uu jiro wiilkii.

Ciidamada TFG-da iyo kuwa AMISOM waxay ka hawlgalaan oo kaliya Muqdisho laakiin dagaallo goos-goos ah oo meelo ka baxsan Muqdisho ku dhexmarey kooxaha kale ayaa sidoo kale qasaaro xoog leh u geystey rayidka. Tusaale ahaan, dagaallo dhexmarey kooxaha hubayan ee iska soo horjeeda ee Xisbul-Islaam iyo Ahlu Sunna Wal-Jameeca oo ka dhacay deegaannada gobollada Dhexe ee ku dhow Dhuusamareeb iyo Beledweyne waxaa horraantii sannadka 2010-ka ku barakacay dad ka badan 25,000 oo qof. Sida lawada sheegeyna, tiro gaareys 63,000 oo qof ayaa 3-dii todobaad ee ugu horreysey sannadkan ka qaxey guryahooda oo ku yaal deegaannada Koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya.

Xubnaha ka tirsan beesha caalamka inta badan kaalin toos ah ayey kaga jiraan arrinta Soomaaliya—mararka qaarna kaalin aan waxtar lahayn ayey ka qaataan. Intooda badan xubnaha muhiimka ah ee beesha caalamka sida Midowga Afrika, Mareykanka iyo Midowga Yurub waxay qaateen siyaasad ah in taageero xoog leh la siiyo dawladda TFG-da sida in la hubeeyo loona tababaro ciidamadeeda. Dawladda Kenya ee deriska ah iyadoo is-qarinaysa ayey dhallinyaro Soomaaliyeed ka qortey xeryaha qaxootiga si ay u dagaallamaan—taasi oo ka hor imanaysa mabaadii'da bani'aadannimo waxayna dib ugu celinaysaa isla fawdadii ay ka soo carareen. Ereteriya, iyadoo wadda dadaal ay ku mijaxaabinayso danaha gobolka ee cadawgeeda siyaasadeed ee Itoobiya waxay taageertey al-Shabaab iyo kooxaha kale ee Soomaaliyeed ee mucaaradka ah.

Dawladaha taageeraya TFG-da waxay ku qanacsan yihiin inay u taagan tahay fursad dhab ah ee Soomaaliya ku gaari karto nabad iyo maamul wanaag, halka al-Shabaab-na yihiin barta hogaaminaysa argagixisada caalamiga ah ee ka jirta gobolka. Qaar badan oo ka mid ah dadka wax falanqeeya ayaa u arka jaangooyada siyaasadeed ee caynkan ah mid aan aragti dheer ku qotomin. Laakiin wax kasta oo lagu sifeeyaba waxa muuqata in siyaasadani aysan ku guulaysan inay gaarto yoolkeedii. Dawlada Federaalka KMG ah wwli waa koox ku kooban qayb yar oo ka mid ah caasimada oo si joogta ahna loogu hayo weerarro milateri oo aan kala joogsanayn; waxayna u dhowdahay inay burburi lahayd haddeysan ahaan lahayn taageerada AMISOM. Dadka Soomaaliya waxay weli la saxariirayaan xadgudubyo baahsan oo ka dhan ah bani'aadanimada iyo weerarro aan kala sooc lahayn iyo al-Shabaab oo sii awood badnaatey, xagjir-na sii noqotey, iyadoo weliba cadaadis sii kordhaya uu caalamku kuhayo.

Dhinaca kale, mid kamid ah mushkuladaha bani'aadannimo ee ugu ba'an dunida ayaa sii murgeysa maalin kasta. Qiyaas ahaan 1.5 malyun oo Soomaali ah ayaa ka bara kacay guryahooda, kala bar dadkuna waxay u baahi qabaan gargaar bani'aadannimo oo deg-deg ah in lala soo gaaro. In kabadan nus malyuun qof ayaa gabbaad ahaan u galay dalal kale iyagoo qaxooti ah aadey dalalka dibedda qaxooti ahaan. Marka qoraalkan la qorayona Barnaamijka Cuntada Adduunka ee WFP waxaa qasab ku noqotey inay hakad geliso cunno qaybin ay ka waddey dhul ballaaran oo ku yaal Koonfurta Soomaaliya iyadoo sabab uga dhigtey hanjabaado, weerarro iyo dalabaad aan macquul ahayn oo kaga yimid al-Shabaab iyo kooxaha kale ee hubaysan.  Warbixin ay dhawaan Qaramada Midoobay soosaartey waxaaa lagu sheegey in qayb balaarran oo ah raashinka gargaarka ah ee WFP geyso Soomaaliya inay leexsadaan qandaraaslayaal awood badan oo Soomaali ah iyo kooxaha hubaysan.

Ma jirto xal fudud oo ay leedahay xaalada cakiran iyo mushkilada qotada dheer ee kala dhantaashey Soomaaliya. Laakiin UN-ka iyo ururrada dawladuhu ku mideysan yihiin iyo dalalka saamaynta leh waa inay marka hore bedelaan siyaasadaha gacansiinaya xadgudubyada u dhaca ya sida xad-dhaafka ah.

Dawladda Mareykanku waa inay joojisaa hoobiyayaasha iyo rasaasta hoobiyaasha  ee ay Muqdisho ugu direyso TFG-da, sidii ay yeeshey 2009-kii, maadaama adeegsiga hubkaasi uusan wax tixgelin ah siinayn xeerarka dagaalka, uuna burburinayo guryaha iyo nolsoha qoysaska. Hay'adaha Qaramada Midoobay waa inay dalbadaan in ciidamada AMISOM iyo kuwa dawladda FKMG ah ay sidoo kale dhowraan shuruucda dagaalka oo yeysanna iska indha tirin xadgudubyada ay saaxiibadoodu dhulka ku gelayaan.

Al-Shabaab iyo kooxaha kale ee hubaysan waa inay joojiyaan xad gudubyada ay ku kacayaan sida hoobiyayaasha ay u ridaan si aan kala sooc lahayn ayna ka soo ridayaan meelaha rayidka aadka u degan yihiin, rayidka oo gabbaad ahaan loo isticmaalo iyo askar u qorashada carruurta. Al-Shabaab waa inay sidoo kale joojisaa karbaashida, addimo goynta, madaxyo-goynta, iyo falalka kale ee ka horjeeda heerarka caalamiga ee xuquuqda bani'aadannimada.

## Talo Soojeedin

### Ku socoto Dawladda Federaalka KMG ah ee Soomaaliya

- Waa inay si dhaqsi ah ku soo saartaa amarro guud oo cad-cad ayna qaaddaa dhammaan talaaboyinka muhiimka ah ee lagu xaqiijinayo ciidamda amniga ee dawlada FKMG ah iyo maliishiyaadka xulafada la ah inay u hoggaansamaan sharciga caalamiga ah ee bani'aadannimada iyo xuquuqda aadanaha.
- Inay joojiso hoobiyayaasha loo sticmaalayo deegaannada Muqdisho ee rayidku degan yihiin ilaa laga qaadayo hirgelinta tallaabooyin lagu sugayo in isticmaalidoodu uu waafaqsan yahay mabaadii'da wax kala soocidda iyo cabbirka sida uu qabo xeerka caalamiga ah ee bani'aadannimada.
- Inay xaqiijiso in dhamaan eedaha loo qaateenka ah ee xadgudubyada ka dhanka ah bani'aadannimada ee ay gaystaan cidamda dawladda si dhaqsi ah, dhexdhexaad ah oon qarsoodi lahayn loo soo baaro isla markaana lala xisaabtamo cidii mas'uulka ka ahayd xadgudubyada halista ah iyadoon la eegeyn derajadoda.
- In lagu casumo Xafiiska Qaramada Midoobay ee Madaxa Xuquuqda Aadanaha inuu soo kordhiyo tirada shaqaalha kormeereysa kana soo warramaysa xadgudubyada xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya.
- In la sameeyo kala shaandhayn aad u culus lana qaado tallaabooyin kale oo wax ku ool ah si loo xaqiijiyo in carruur da'doodu ka yar tahay 18-jir aan loo qorin inay galaan ciidamda hubaysan ee dawlada. Isla markaana la sii daayo carruurtii hore loo qorey.
- Inay codsataa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay inuu soo dhiso Guddi Wax-baaris oo baaritaan ku sameeya soona diiwaangeliya dembiyadii khatarta ahaa kana soo talo-bixiya siyaalaha loo hagaajin karo isla-xisaabtanka xadgudubyada ka dhanka ah xeerka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo kan bani'aadannimada ee Soomaaliya, isla markaana ay si buuxdana ula shaqeyso Guddigaas marka la soo dhiso.

### Ku socoto Midowga Afrika iyo Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM)

- In la xaqiijiyo in dhamaan eedaha loo qaateenka ah ee xadgudubyada ka dhanka ah bani'aadannimada ee ay gaystaan cidamda AMISOM si dhaqsi ah, dhexdhexaad ah oon qarsoodi lahayn loo soo baaro isla markaana lala xisaabtamo cidii mas'uulka ka ahayd xadgudubyadaas halista ah iyadoon derajadooda la eegeyn.

- In la xaqiijiyo in ciidamada AMISOM joojiyaan hoobiyayaasha loo sticmaalayo deegaannada Muqdisho ee rayidku degan yihiin ilaa laga qaadayo hirgelinta tallaabooyin lagu sugayo in isticmaalidoodu uu waafaqsan yahay mabaadii'da wax kala soocida iyo cabbirka sida uu qabo xeerka caalamiga ah ee bani'aadannimada.
- In la xaqiijiyo in shaqaalaha AMISOM ay helaan tababarka ku habboon ee sharciga caalamiga ah ee bani'aadanimada.
- In laga fiirsado hirgelinta nidaam si wax-ku-ool ah magdhaw looga bixinayo dhimashada ku timaadda rayidka, dhaawaca iyo burburka hantida. Nidaamkani waa inuusan ku koobnaanin magdhawyada laga bixiyo xadgudubyada ka dhanka ah xeerarka dagaalka oo kaliya ee ay ku jiraan lacago tacsiyeyn ah oo lagu kaalmeynayo cidii ay soo gaartey waxyeelo salka ku hayso hawlaha ay ciidanka AMISOM wadaan balse aysan iyagu si cad mas'uul uga ahayn waxyeeladaas. Nidamkan waa inaan loo arkin mid bedel u noqon kara tababarida iyo tallaabooyinkii kale ee lagu xaqiijin lahaa in shaqaalaha Milateriga ah ee AMISOM ay u hoggaansamaan xeerka caalamiga ah ee bani'aadannimada .
- inay codsato in Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay uu soo dhiso Guddi Baaritaan oo baaritaan ku sameeya soona diiwaangeliya dembiyadii khatarta ahaa kana soo talo-bixiya siyaalaha loo hagaajin karo isla-xisaabtanka xadgudubyada ka dhanka ah xeerka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo kan bani'aadannimada ee Soomaaliya.

## Ku socoto al-Shabaab iyo Kooxaha kale ee Mucaaradka ah ee ka dagaalamaya Muqdisho

- Waa inay dhaqsi u qaadaan dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah si loo dhameeyo xadgudubyada ka dhanka ah xeerka caalamiga ah bani'aadanimada:
    - Inay joojiyaan in rayidka laga dhigto "gabbaad" amaba la geliyo khatar aan loo baahnayn sida in weerarrada laga qaado degaannada dadku aadka ugu badan yihiin.
    - In lasoo afjaro dhammaan hoobiyayaasha laga tuurayo deegaanada Muqdisho ee dadku degan yihiin illaa laga qaadayo tallaabooyin lagu hirgelinayo xaqiijinta in isticmaalidoodu uu waafaqsan yahay mabaadii-da kala-soocida iyo cabbirka sida uu qabo xeerka caalamiga ah.
    - Inay fududeeyaan in rayidku u baxaan meelo ammaan ah inta ay socdaan hawlgallada milateri.
    - Inay joojiyaan hanjabaadaha dilka ah iyo dilalka qorsheysan ee dadka rayidka ah.

- In la dhammeeyo dhammaan dadka qaangaarka ah  ee sida qasabka ciidan ahaanta loogu qorayo.
- In la dhameeyo qorashada carruurta da'doodu ka yar tahay 18-jirka ee askar ahaanta loo qorayo, isla markaana la siidaayo carruurtii hore loo qortey.
- In sida ku haboon loola xisaabtamo dhammaan shaqaalaha, gaystey xadgudubyada halista ah ee jebinaya xeerka caalamiga ah ee bani'aadannimada iyadoon la eegeyn derajadiisa.

## Ku socoto al-Shabaab iyo maamullada deegaanka ee Deegaannada al-Shabaab maamulaan

- Waa inay dhaqsi u qaadaan dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah si loogu dhaqmo mabaadii'da xeerarka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha:
  - In la qaado xayiraadaha rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayn ee  saaran xuquuqda hadalka, ka mid noqoshada, dibed-baxyada nabadeed iyo tan diinta. Waxaana kuwan ku jira tallaabooyinka kooxaha u diidaya inay kulmaan ama inay si xor ah u hadlaan, kuwaasoo ciqaabaya  haddii qofku uusan tukan, amaba haddii uu hawl guud ku jiro waqtiyada salaadda, iyo isku-dayada lagu faafreebayo waxbarahada dadweynaha.
  - In la joojiyo dhammaan tallaabooyinka lagu takoorayo dumarka oo ay ku jiraan xayiraadaha saaran shaqadooda, safarka iyo labiskooda.
  - In la dhameeyo ciqaabaha naxariis-darrada ah, bani'aadannimada ka baxsan iyo kuwa sharaf-dilka ah oo ay ku jiraan xukumada dilka ah, addimo-goynta, iyo karbaashida dembiyada iyo gefafka kaleba.
  - In la joojiyo faragelinta xad-dhaafka ee xaqa qofku u leeyahay keli ahaanshaha qofeed, tan aqalkiisa, qoyskiisa iyo tan muuqaalkiisa, oo ay ku jirto ciqaabida dadka uu lebiskoodu ama muuqaalkoodu waafaqsanayn habkii ay soo rogeen al-Shabaab ama maamullada hoose ee deegaanku.
  - In la xaqiijiyo in dhammaan xukumada dembiyada ee la  rido ay yihiin kuwo ku yimid nidaam loo marey tallaabooyin ku qotoma raacista maxkamad cadaalad ah oo la marsiiyey eedeysanaha.
  - In si ku haboon loolal xisaabtamo xubnaha al-Shabaab iyo maamulayaasha hoose ee gaysta xadgudubyada ka dhanka ah xuquuqda aadanaha.

## Kusocoto Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay

- Waa inay taageeraan dhismaha Guddi wax soo baara oo madaxbannaan, dhexdhexaadna ah si ay u soo baaraan una soo diiwaangeliyaan dembiyada

waaweyn ugana soo talo bixiyaan qaabka loo hagaajin karo isla-xisaabtanka xadgudubyada ka dhanka ah xeerka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo kan bani'aadannimada ee Soomaaliya.

- Waa inay si cad u cambaareeyaan xadgudubyada ka dhanka ah xeerka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo bani'aadannimada ee ay gaysanayaan dhammaan dhinacyada ku dagaalama Soomaaliya oo ay ku jiraan AMISOM iyo ciidanka Dawladda FKMG ah.
- Inuu si adag u dhaqangeliyo cunaqabataynta Qaramada Midoobay ee dhinaca hubka ee saaran Soomaaliya, cidna aan loo fasixin inay u gudbiso hoobiyayaal iyo rasaasta hoobiyaasha TFG-da ama AMISOM illaa laga hirgelinayo tallaabooyin xaqiijinaya in adeegsiga hubkani uu waafaqsan yahay mabaadii'da wax-kala soocaysa oo miisaaman sida uu qabo xeerka caalamiga ah.
- In la xaqiijiyo in Xafiiska Qaramada Midoobay ee siyaasadda Soomaaliya uusan qaadin tallaabooyin wax u dhimaya dhexdhexaadnimada hay'adaha gargaarka ee ka hawlga Soomaaliya.
- In lagu dhiirrigeliyo Xafiiska hay'adda Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Aadanaha inay ballaariso awooddeeda waxqabad si ay u fuliso kormeeridda iyo ka-warbixinta xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya iyadoo hawshaasna la siinayo muhiimad gaar ah.
- In lagu dhiirrigeliyo Hay'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan qaxooyiga inay kala shaqeyso dawladda Kenya sidii ay ugu oggolaan lahayd inay si nabadgelyo ah ugu soo laabtaan xeryaha qaxootiga ee Dhadhaab raggii iyo dhallinyaradii xeryahaas laga qorey sannadkii 2009-ka si milateri ahaan loogu geeyo Soomaaliya.
- In loogu baaqo Kenya xaqiijinta in qaxootiga ka soo cararaya Soomaaliya ay Kenya ka helaan badbaadin iyo gargaar.
- In la taageero ballaarinta awoodda waxqabad ee xafiiska Qaramada Midoobay u qaabilsan xuquuqda aadanaha si uu u fuliyo la socodka iyo ka-warbixinta xuquuqda aadanaha ee Soomaaliyaa hawshaasna mudnaan gaar ah la siiyo.

## Ku socoto Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay

- Inuu soo dhiso Guddi wax soo baara oo madaxbannaan, dhexdhexaadna ah si ay u soo baaraan una soo diiwaangeliyaan dembiyada waaweyn ugana soo talo bixiyaan qaabka loo hagaajin karo isla-xisaabtanka xadgudubyada ka dhanka ah xeerka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo kan bani'aadannimada ee Soomaaliya iyadoo lala kaashanayo Midowga Afrika gacanna laga helayo xafiiska Qaramada Midoobay u qaabilsan Xuquuqda Aadanaha.

- In la taageero ballaarinta awoodda waxqabad ee xafiiska Qaramada Midoobay u qaabilsan xuquuqda aadanaha si uu u fuliyo la socodka iyo ka-warbixinta xuquuqda aadanaha ee Soomaaliyaa hawshaasna mudnaan gaar ah la siiyo.

## Ku socoto Xafiiska Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Aadanaha

- In la kordhiyo tirada saraakiisha xuquuqda aadanaha ee kormeereysa si muuqatana uga soo warbixinaysa xadgudubyada xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya.
- In la xaqiijiyo kormeerid, dhexdhexaad ah, baaritaan, iyo si aan qarsoonayn oo looga soo warramo xadgudubyada xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya ay tahay mudnaanta xafiiska Xuquuqda Aadanaha ee shaqaalaha xuquuqda aadanaha ee ka shaqeynaya Soomaaliya, oo ay ku jiraan qaybta Xuquuqda aadanaha ee ka hawlgala xafiiska siyaasadda ee Soomaaliya.

## Ku socoto Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga

- Inay kala shaqeyso dawladda Kenya sidii ay ugu oggolaan lahayd inay si nabadgelyo ah ugu soo laabtaan xeryaha qaxootiga ee Dhadhaab raggii iyo dhallinyaradii xeryahaas laga qorey sannadkii 2009-ka si milateri ahaan loogu geeyo Soomaaliya.
- In loogu baaqo Kenya xaqiijinta in qaxootiga ka soo cararaya Soomaaliya ay Kenya ka helaan badbaadin iyo gargaar.

## Ku Socoto Golaha Xuquuqda Aadanaha

- In la soo dhiso guddi gaar ah oo u xilsaaran Geeska Afrika kaasi oo soo baara kana soo warbixiya xaaladda xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya, Ereteriya iyo Itoobiya, oo ay ku jiraan xadgudubyada waaweyn ee ka dhanka ah qaanuunka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo kan gargaarka bani'aadannimo.
- In la qabto kulan gaar ah oo ku saabsan Soomaaliya ayna ku jiraan xubnaha muhiimka ah sida Wakiilka Gaarka ah ee xafiiska Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, Midowga Afrika Dawlada FKMG ah iyo wakiillada bulshada rayidka ah.

## Ku socoto Dawladda Kenya

- Inay aqoonsato in qoristii ciidanka ee xeryaha qaxoootiga ee Dhadhaab sannadkii 2009-ka si ay milateri ahaan uga hawlgalaan Soomaaliya uu ahaa sharci darro ayna joojiso hawlahooda una oggolaato inay si nabadgelyo ah dib ugu soo laabtaan xryaha.

- Inay xaqiijiso in qaxootiga ka soo cararaya Soomaaliya ay Kenya ka helaan badbaadin iyo gargaar.

## Ku socoto Dawladaha Ugandha iyo Burundi

- Inay horseed ka noqdaan ku-adkaynta Midowga Afriaka in lagu xoojiyo tababarka ku habboon ee dhinaca qaanuunka xuquuqda gargaarka bani'aadannimada.
- Inay horseed ka noqdaan ku adkaynta Midowga Afrika inay soo baaraan siyaalaha magdhow looga bixin lahaa dhimashada rayidka, dhaawaca iyo burburinta hantiyeed.

## Ku socoto Mareykanka, Midowga Yurub iyo Dalalka ku jira, iyo Midowga Afrika

- Inay bilaabaan dib u eegid siyaasadeed oo qoto dheer oo wax looga qabanayo Soomaaliya kaasoo ku wajahan dhowrista xuquuqda aasaasiga ah ee bani'aadannimo ee dadka Soomaaliyeed. Midowga Afrika waa inay qaataan kaalin hormuud ah oo lagu hirgelinayo siyaasadahan isbedelka lagu sameeyey.
- Waa inay si cad u cambaareeyaan xadgudubyada ka dhanka ah xeerka caalamiga ah ee gargaarka bani'aadannimo iyo kan xuquuqda aadanaha ee ay gaysanayaan dhammaan dhinacyada ku lugta leh dagaalka Soomaaliya oo ay ku jiraan AMISOM iyo TFG.
- Inay joojiyaan hoobiyayaasha iyo rasaasta hoobiyayaasha ee la gaarsiinayo AMISOM iyo TFG-da inta laga dhaqangelinayo tallaabooyin lagu xaqiijinayo in isticmaalkoodu uu waafaqsan yahay xeerka caalamiga ah ee bani'aadannimada.
- In si cad loogu baaqo dawladda Kenya siideynta raggii iyo dhallinyaradii laga qorey xeryaha qaxootiga ee Dhadhaab sannadkii 2009-ka si ay milateri ahaan uga hawlgalaan Soomaaliya, lana xaqiijiyo in qaxootigani ay si nabadgelyo ah ugu soo noqon karaan xeryaha.
- In lagu adkeeyo Kenya in qaxootiga ka soo baxsanaya Soomaaliya ay u suurto gasho inay ka helaan Kenya badbaadin iyo gargaar.
- In lagu xoojiyo tasiilaaadka adeeg ee xuquuqda aadanaha mid dawlad ahaan looga taageero ciidamada amniga sida hababka aan nafta halis-gelinayn ee lagu xakameeyo rabshadaha, xurmeynta xeerarka dagaalka, tallaabooyinka lagula dirirayo jirdilka iyo isla xisaabtan gudaha.